# Lambarkaaga Bulshada iyo Kaarka

Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Sidee ayaan ku heli karaa lambarka iyo kaarka? | 1 |
| Waa imisa kharashka aan bixinayo? | 3 |
| Ma waxaa jira kaarar kala duwan? | 3 |
| Sidee ayaan Ilamahyga ugu heli karaa Lambarka Bulshada? | 3 |
| Maxaa Dhacaya haddii aan bedelo magaceyga? | 4 |
| Sidee ayaan ku ogaan karaa in diiwaanka la iga hayo uu sax yahay? | 4 |
| Maxaa dhacaya haddii ay bedesho sharciga aan wadanka ku joogto ama aan noqdo muwaadin? | 5 |
| Maxaan yeelayaa haddii uu iga lumo ama la iga xado kaarka? | 5 |
| Sidee ayaan u ilaalin karaa Lambarkayga Bulshada? | 5 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 6 |


Lambarka Bulshada waa muhim waayo si aad u hesho shaqada, u qaadato macaashka Lambarka Bulshada una hesho adeegga dawladda waa inaad leedahay lambarka. Qaar ka mid ah goobaha ganacsiga, sida bangiyada iyo shirkadaha deynta bixiya, waxa ay dadka weydiiyaan lambarka.

Haddii aadan heysan dhalashada Mareykanka, weli waad u baahan tahay Lambarka Bulshada. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa Daabacaadda 05-10096 *Lambarka Bulashada ee aan dadka aan heysan dhalashada* (Publication No. 05-10096), *Social Security Numbers for Noncitizens*. Haddii aad is ku meel gaar shaqo ugu joogto Mareykanka, akhri Daabacaadda 05-10107 *Shaqaalaha Ajnabiga ah iyo Lambarka Buslahad* (Publication No. 05-10107) *Foreign Workers and Social Security Numbers*.

## Sidee ayaan ku heli karaa lambarka iyo kaarka?

Si aad u codsato kaarka iyo Lambarka Bulshada:

- Buuxi *codsiga kaarka LAmbarka Bulshada* (*Application for a Social Security Card*) (Form SS-5); iyo
- Xafiiska keen wrqadaha asliga ah ama nuqul shaabadeysan oo ay soo xaqiijisay hay'adda bixisay oo caddeynaya: Ma ogolaaneyno

nuqul ama nuqul leh shaabadda xaqiijiyaha (nootari) Aqoonsiyada oo dhan waa in ay ahaadaan (kuwa aan dhicin).

— Dhalashada mareykanka ama sharciga aad wadanka ku joogto (oo ay ka mid tahay ogolaashaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha (DHS) in aad ka shaqeysan karto Mareykanka);

— Da'da; iyo

— Warqadda aqoonsiga.

Codsiga oo aad buuxisay ayaad boostada soo dhigi kartaa (Foomka SS-5) adiga oo soo raacinaya aqoonsigaaga ama foomka ka buuxinaya kombiyuutarka ama aad u soo gudbin karaa Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka.

Dadka da'doodu ka weyn tahay 12 sano waxaa waajib ah in ay maraan wareysi marka ugu horeysa ee ay codasnayaan Lambarka Bulshada iyo kaarka xitaa haddii waaali ama qof mas'uul ka ah u saxiixayo kaarka.

**Dhalshada ama Sharciga Aad Wadanka Ku Joogto** waxa aan ogolahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan heysashada dhalashada waddanka. Taas waxaa ka mid ah Shahaadada dhalashada Mareykanka, baasaboodka Mareykanka, Shahaadada qaadashada dhalashada ama shahaadadada dhalashada. Haddii aadan heysan dhalashada, Xafiiska Lambarka Bulshada waxaa laga yaabaa in ay ku weydiiyaan caddeyn muujineysa warqadaha socdaalka. Aqoonsiyada la ogol yahay waxa ka mid ah:

- Foomka I-551, Kaarka Degaanashsha Rasmiga ah (kaarka cagaaran (green card) oo ay ka mid tahay ogolaashaha (fiisahaha) dadka soo haajira oo makiinaddu akhrin karto ku dhagan baasboorka xilligiisu dhamaaday).
- I-94, Foomka I-94 oo aad ku lifaaqday baasboorka aan dhicin, ama.
- I-766, Warqadda Ogolaashaha Shaqada ) EAD, ogolaashaha shaqada).

Ardeyda waxbarashada caalamiga ah ku joogta waa in ay soo bandhiga aqoonsigooda. Macluumaad dheeraad ah, ka akhri *International Students And Social Security Numbers* (*Ardayda Caalamiga ah iyo Lambarka Bulshada*) (Publication No. 05-10181).

**Da'da**: Haddii aad Mareykanka ku dhalatay, waa in aad keentaa shahaadada dhalashada ee Mareykanka (haddii aad heysato, waa waajib in aad keento) Haddii aadan heysan shaaahada dhalashada, waxaa laga yaabaa inaan ogolaano:

- Caddeyn xaga is diiwaan gelinta diinta oo la sameeyey intii aadan 5 sano jir noqon marka laga soo bilbaabo taariikhda dhalashada;
- Diiwaanka dhalashada ee cisbitaalka aad dhalatay ee Mareykanka;
- Baasaboor.

Haddii aad ku dhalatay meel ka baxsan Mareykanka, waxaa lagaa doonayaa in aad keento shahaadada dhalashada (haddii aad heysato shahaado ama aad 10 cisho gudahood ku heli karto shahaadada). Haddii aadan shahaadada heli karin, waxaa suurogal ah in aan ogolaano:

- Baasaboorka wadamada dibadda;
- I-551, kaarka deganashaha rasmiga ah; ama
- I-94 Diiwaanka gelitaanka/bixidda.

**Warqadda Aqoonsiga**: waxa aan ogolahay dokumeentiga qaarkiis oo kaliya inay cadeyn u noqon karaan in lagugu aqoonsado. Aqoosniayadaas waa in ay noqdaan kuwo aan taariikhdoodu dhamaan (dhicin) magacaaga, waxyaabaha lagugu aqoonsan karo iyo sawirkagana la socdo. Lambarka Bulshada waxa ay ku weydiisanayaan Ogolaashaha wadidda gaadiidka, aqoonsiga gobolka ee aan aheyn wadidda gaadiidka ama Baasaboorka Mareykanka aqoonsi ahaan. Haddii aadan heysan aqoonsiyada aan ku weydiino, waxaan ku weydiisan karnaa aqoonsiyo kale oo ay ka mid yihiin:

- Aqoonsiga shaqada;
- Aqoonsiga dusgiga;
- Kaarka caafimaadka (ma aha kan Medicare)

*(rogad)*

- Aqoonsiga ciidamada gaashaandhigga;
- Amarka maxkamadda ee korsashada
- Ceymiska dhaxalka; ama
- Warqadaha nikaaxa (marka magaca isbedelo oo kaliya).

***Aqoonsiyada oo dhan waa in ay noqdaan asalkii ama nuqul laga soo shaabadeeyey hay'adda soo sartay. Ma ogolaaneyno nuqul ama nuqul leh shaabadda xaqiijiyaha (nootari)***. Waxaa laga yaabaa in aan hal qoraal ama aqoonsi u adeegsano labo ujeeddo. Tusaale ahaan, waxaa suurogal in aan baasaboorkaaga u adeegsano aqoosni ahaan iyo caddeyn dhalashada ah. Ama, aan u adeegsano shahaadada dhalashada caddeyn da'da iyo dhalashada. ***Hase yeeshee, waa in aad keentaa ugu yaraan laba aqoonsi***.

Boostada ayaa laguugu soo dirayaa lambarkaaga iyo kaarka sida ugu dhaqsaha badan ee aan u helno macluumaadka oo aan ka xaqiijino aqoonsiyadaada xafiiska soo saaray.

## Waa imisa kharashka aan bixinayo?

Wax lacag ah lagaama doonay si aad u codsato kaarka iyo Lambarka Bulshada. Haddii uu qof kula soo xiriiro oo uu doonayo inuu lacag kaaga qaado codsiga helitaanka lambarka ama kaarka, xusuusnow in adeegga Lambarka Bulshada uu yahay mid lacag la'aan ah. Cid kasta oo isku dayda in ay lacag kaaga qaataan waa in aad la socodsiisaa Xafiiska Dambibaaraha Guud ee **1-800-269-0271**.

## Ma waxaa jira kaarar kala duwan?

Xafiiskayagu waxa uu bixiyaa sadex kaar. Dhamaan kaararka waxaa lagu qoraa magaca iyo Lambarka Bulshada.

- Nooca ugu horeeya waxa ku qoran magaca iyo Lambarka Bulshada waadna ku shaqeyn kartaa xayiraad (xadidaadna) ma laha. Waxaa la siiyaa:
  - —Dadka u dhashay Mareykanka; iyo
  - —Dadka si sharci ah u soo gala Mareykanka kuna jooga deganaasho rasmi ah.
- Nooca labaad waa id lagu qoro magaca iyo lambarka iyo fariin, "LOO OGOL YAHAY SHAQADA OO KALIYA MARKA LA HUBIYO OGOLAASHAHA DHS)." Kaarkan waxaa loo siiyaa dadka si sharci ah ku soo galay waddanka Mareykanka si ku meel gaar ah heystana ogolaashaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha in ay ka shaqeysan karaan waddanka.
- Nooca sadexaad ee kaarka waxa ku qoran magaca iyo lambarka iyo fariinta "LOOMA OGOLA INUU SHAQEEYO." Waxaa la siiyaa dadka wadamada kale ka yimaadka oo:
  - —Si sharci ah ku deggan waddanka oo aan heysan ogolaashaha shaqada ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo waddanka u jooga sababo aan shaqo aheyn una baahan Lambarka Bulshada sababo kala duwan; ama
  - —U baahan Lambarka Bulshada waaayo sharciga dawladda dhexe ayaa waajib ka dhigaya in ay heystaan si u helaan macaashka ama adeegga.

## Sidee ayaan Ilamahyga ugu heli karaa Lambarka Bulshada?

Waxaa ugu wanaagsan in aad lambarka u qaado ilamahaaga marka uu dhasho. Waad u codsan kartaa Lambarka Bulshada ilmaha marka aad codsaneyso shahaadada dhalashada. Gobolka so saara shahaada dhalashada ayaa nala wadaagaya macluumaadka ilamaha. Waxaanu boostada kuugu soo direynaa kaarka Lambarka Bulshada.

Ama, waad sugi kartaa oo mar dambe aad codsi u soo gudbin kartaa mid ka mid ah xafiiska Lambarka Bulshada. Haddii aad sugto, waa in aad soo gdubisaa caddeyn muujineysa da'da ilmaha, aqoonsiga dhalashada Mareykanka. Waa in aad keentaa caddeyn muujineysa waxa aad isu tihiin ama sida aad ilmaha mas'uulka uga tahay. Waa in sidoo kale soo bandhigtaa aqoosniga qofka. Waa in aan xaqiijinaa aqoonsiag dhalshada ilmaha, taasoo qaadan karta 12 todobaad in kaarka la idin soo



*(rogad)*

diro. Si aan u xaqiijino shahaadada dhalashada, xafiiska Lambarka Bulshada waxa ay la xiriiryaan xafiiska soo saaray.

Korinta: Waanu siineynaa lambarka ilmaha aad korsaneyso ka hor inta aanay dhamaan warqadaha sharciga ah, but laakiin waxaa laga yaabaa in aad sugto. Haddii aad sugto, waxa aad codsan kartaa lambarka adiga oo isticmaalaya magaca cusub ee ilmaha. Haddii aad dooneyso in aad sheegato ilmahaagasi aad canshuurta ugu xareysato inta aanay dhamaan waqradaha ogolaashaha korinta, la xiriir Waaxda Canshuuraha adiga oo buuxinaya Form W-7A, *Application for Taxpayer Identification Number for Pending U.S. Adoptions*. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa *Social Security Numbers For Noncitizens* (*Lambarka Bulshada Dadka Aan Heysan Dhalashada*) (Publication No. 05-10023).

## Maxaa Dhacaya haddii aan bedelo magaceyga?

Haddii aad magacaaga si sharci ah u bedesho sababo la xiriira guurka, furiinka, ama maxkamadeed, ama sabab kalaba, waxa aad u baahan in aad soo wargeliso Lambarka Bulshadasi ay u saxaan kaarka. Haddii aad shaqeyneyso la socodsii halka aad ka shaqeyso. Haddii aadan noo sheegin marka aad bedesho magacaaga, waxaa laga yaabaa:

- In dib loo dhigo lacagta canshuurta ii soo nqon laheyd.
- Waxa ay kaa hor istaageysaa in mushaharkaaga si sax loo diiwaangeliyo Lambarka Bulshada, taasoo yareyneysa macaashka aad ka heleyso Lambarka Bulshada ee mustaqbalka.

Haddii aad dooneyso in aad bedesho magaca kuugu qoran Lambarka Bulshada, waa in aad keentaa caddeyn muujineysa in magaacaga si sharciga waafaqsan u bedeshay. Aqoonsiyada ay Lambarka Bulshada oo lagu cadeyn karo in magaca bedelay waxaa ka mid ah:

- Warqadaha guurka;
- Warqadaha furiinka;
- Shaahaha qaadashada dhalashada oo ay ku qoran tahay magaca cusub; ama
- Amar maxkamadeed oo magaca lagu bedelay.

Haddii aqoonsiga aad noo soo gudbisay ee sharci ahaan aad magaca ku bedelatay aanay ku filneyn in aanu kugu aqoonsano diiwaankayaga ama magacaaga bedeshay in ka badan laba sano (afar sano ka badan haddii aad ka yar tahay 18 sano), waa in aad soo bandhigtaa aqoonsi caddeynaya magacaagii hore (sida uu ugu dhigan yahay aqoonsiga). Waanu ogolaaneynaa aqoonsi uu ku qoran yahay magacaagii hore oo taariikhdiisu dhacday.

Haddii aadan heysa wax aqoonsi ah oo magacaagii hore ku qoran yahay, waxaa laga yaabaa in aan ogolaano aqoonsi taariikhdu dhamaatay oo aad ku heysato magacaaga cusub, marba haddii aadn xaqiijin karno inuu yahay aqoonsi si rasmi laguugu aqoonsan karo diiwaankeena.

Lambarka kaarkaaga ma is bedelayo oo waxa uu nqoqnaya kii ku qornaa kaarkii hore laakiin magaca cusub ayaa ku qoran.

## Sidee ayaan ku ogaan karaa in diiwaanka la iga hayo uu sax yahay?

Goobaha shaqada oo dhan waxa nuqul ka mid ah foomka W-2 (*Wage and Tax Statement*) xafiiska Lambarka Bulshada. Waxaanu isla barbardhigeynaa magacaaga iyo Lambarka Bulshada ee ku qoran foomka W-2 iyo macluumaadka diiwaanka noogu qoran. Dakhligii ku soo galay ee ku qoran foomka W-2 ayaanu ku darnaa diiwaanka Lambarka Bulshada.

Waa muhim in magacaaga iyo Lambarka Bulshada ee ku qoran kaarka lagu siiyey ay la mid yihiin kan lagu hayo goobta shaqada. Adiga ayaa xil kaa saaran yahay in aad xaqiijiso in diiwaanka Lambarka Bulshada iyo kan goobta shaqad ay sax yihiin. Haddii Lambarka Bulshada uusan sax aheyn, la xiriirka xafiiska Lambarka Bulshada si ay u bedelaan. Hubi in



*(rogad)*

foomka W-2 ee shaqada uu sax yahay, haddii aanu sax aheyn, u gudbi goobta shaqada maclumaad sax ah.

Waxa sidoo kale lacagta aad shaqeyso aad ka ogaan kartaa Warbixinta Lambarka Bulshada. Warbixinta waxaa laga heli karaa barta internetka ee dadka shaqeeya oo da'doodu ka weyn tahay 18 jir. Si aad u aragtaada Warbixinta, soo booqo barta internetka ee ***www.socialsecurity.gov/myaccount*** oo ka furo xisaab.

## Maxaa dhacaya haddii ay bedesho sharciga aan wadanka ku joogto ama aan noqdo muwaadin?

Haddii uu isbedelo sharciga aad waddanka ku joogto ama aan qaadato dhalashada waddanka, waa in aad wargelisaa Lambarka Bulshada si aan u diiwaan gelino. Si aad u saxdo sharciga aad wadanka ku joogto ama dhalashada, waxaa lagaa doonayaa in aad keento cadeyn muujineysa sharciga cusub ama dhalashada. Waxa aan ogolnahay qaar ka mid aha qoosniyada caddeynaya dhalshada marka kaar cusub lagu siinayo ama kii hore lagaa bedelayo. Waxaa ka mid ah Shahaadada dhalashada Mareykanka, baasaboodka Mareykanka, Shahaadada qaadashada dhalashada ama shahaadadada dhalashada. Haddii aadan heysan dhalashada, Xafiiska Lambarka Bulshada waxaa laga yaabaa in ay ku weydiiyaan caddeyn muujineysa warqadaha socdaalka.

## Maxaan yeelayaa haddii uu iga lumo ama la iga xado kaarka?

Lacag la'aan ayaad ku bedeli kartaa kaarkaaga Lambarka Bulshada ama kan caruurtaada haddii uu lumo ama la xado. Hase yeeshee, sanadkii sadex jeer oo kaliya ayaad bedeli kartaa ama 10 jeer inta aad nooshahay. Magaca oo qofka iska bedelo ama xaaladaha qaarkood lama xisaabayo. Tusaale ahaan, isbedelka xaga sharciga ah ee ku yimaada dadka aan dhalashada heysan oo waajibka ayey ku tahay in ay kaar cusub qaataan laguma xisaabayo tirada ay bedelan karaan. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa in aanay saameyn kugu yeelan haddii aad caddeyn karto in aad ugu baahan tahay kaarka xaalad adag oo kula soo deristay darteed.

Si aad u hesho kaar lagu bedelo kii dore ee Lambarka Bulshada waxaa lagaa doonayaa in aad:

- Buuxiso *Codisga kaarka Lambarka Bulshada*;
- Aqoonsiyada aan dhicin soo qaado iyo wixii kale oo caddeynaya macluumaadkaaga iyo sawir dhawaanta la qaaday oo muujinaya aqoonsigaaga.
- Caddeyn muujineysa dhalashada Mareykanka haddii aad ku dhalatay meel ka baxsan Mareykanka oo aadan keenin caddeyn muujineysa dhalashada markii aad qaadatay kaarka; iyo
- Caddeyn muujineysa in aad si sharci ah aad waddanka ku degan tahay haddii aadan heysan dhalashada Mareykanka.

Haddii aad degan gobolada qaarkood iyo Degmada Columbia, waxa aad kaarka bedelka ah ka codsan kartaa xisaabta aad ka furatay internetka ee *xogta* Lambarka Bulshada bogeyga ***www.socialsecurity.gov/myaccount***. Soo booqo ***www.socialsecurity.gov/ssnumber*** gobolada ka qeyb qaadanaya iyo shuruudaha ku xisan. Si aad u hesho kaarka laguugu bedelayo kaarka Lambarka Bulshada, waa in aad la timaadaa aqoonsigaaga. Waa in aad keentaa aqoonsi cedynaha da'daada iyo dhalashada Mareykanka haddii aynaan horey ugu heyn diiwaanka.

Magaca iyo lambarka kaarka cusub waxa uu la mid yahay kaarkii hore ee aad heystay.

## Sidee ayaan u ilaalin karaa Lambarkayga Bulshada?

Waa in aad qarsoodi ka dhigtaa lambarkaaga bulshada kana digtoonaataa inaad sheegto haddii aanay muhim aheyn. Waa in aad kaarkaaga Lambarka Bulshada ku xafiddaa meel amaan ah oo aad waqradaha kale oo muhimka ah aad dhigto. Ha ku qaadin jeebka haddii aadan u baahneyn in aad tusto goobta shaqada ama adeeg bixiyayaasha.

*(rogad)*

Waxaanu sameynaa talaabooyin aan kaga hortageyno in si qaldan loo isticmaalo kaarkaaga. Tusaale ahaan, waxaanu waajib ka dhignaa oo si taxadar leh u xaqiijinaa aqoonsiga dadka soo codsada in ay bedelaan kaarka Lambarka Bulshada ee lumay ama la xaday, ama kaararka saxda ah. Sababta aan sidaa u yeelno waa in aan ka hortagno in si been abuur ah lagu qaato Lambarka Bulshada iyada oo la been abuuray aqoonsiyada. Waxaanu ka dhignaa qarsoodi diiwaanka Lambarka Bulshada haddii aanau:

- Sharcigu waajib nooga dhigin in aan soo saarno macluumaadka oo aan u dirno hay'adaha dawladda.
- Macluumaadkaaga loo baahan yahay si laguu siiyo Lambarka Bulshada ama hay'adaha caafimaadka ee dawladda ama adeegga la xiriira gargaarka.

Waa in aad uga taxadartaa wadaagista lambarka oo aad kaarkaaga ka ilaalisaa in si qaldan loo siticmaalo. Bixinta aad bixiso lambarka waa mid aan khasab kugu aheyn xitaa marka lagu weydiisyo lambarka si toos ah. Haddii lagu weydiisto, waxa aad weydiin kartaa:

- Sababta lambarkaaga loogu baahan yahay;
- Sida loo adeegsanayo lambarkaaga;
- Maxaa dhici kara haddii aad diido;
- Waa maxay sharciga waajibka ka dhigaya in aad bixiso lambarkaaga

Jawaabaha su'aalaha waxa ay kaa caawin karaan in aad go'aan ka gaarto in haddii aad dooneyso in aad bixiso lambarka bulshada. Go'aanka kama dambeysta ah adinka ayaa iska leh.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta

(rogad)

ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10002-SO | January 2017
Lambarkaaga Bulshada iyo Kaarka
Your Social Security Number and Card (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha